

FAAFINTA



RASMIGA

الرسمية

الجريدة

**DAWLAD GOBOLEEDKA PUNTLAND SOOMAALIYA**

**لولاية أرض بونت الصومال**

Sannadka 4<sup>aad</sup>

Garowe, 24 Febraayo 2003

Lam. 2

FAAFINTA BILWALBA KA SOO BAXDA

جريدة الشهرية

Qaybta Faafinta Rasmiga ah ee **Madaxtooyada** Dawlad Goboleedka Puntland

Qiimaha : waa Sh.So- 10.000 lambar walba.**Rukunka** Sannadkii waa Sh.So.-170.000 dalaka gudihisa,dibaddana waa Sh.So.500.000-**Rukunka** la waydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilowdaa Ida janaayo. Qiimaha qoritaanka F.R. halkii sadar iyo wixii ka yar waa Sh.So. 3.000 Rukunka iyo Qoritaanka waxaa la waydiistaa Qaybta Maamulka Faafinta Rasmiga ah. Lacagta waxaa lagu bixinayaa xafiiska canshuuraha berriga ee Wasaaradda Maaliyadda.

## TUSMADA

Qaybta Koowaad

Sharci

Qaybta Labaad

W/M

Qayta Saddexaad


Talooyin , Isgaarsiin. Ogaysiis IWM.

Waxba ma leh.

❖ Sharci Lr 4 ee 24/02/2003, kuna saabsan kordhinta khidamaadka Garoonada

Dayuuradaha Puntland .....

**Bogga 1-2**



Ref: Sharci Lr. 4.

Date: 23-2-2003

Kun saabsan Khidmadihii sharci Lr. 8 ee 14/04/99 oo lagu kordhiyey qaadida khidmadaha ku cad faqradahan D, G, 1.2. ee sharcigan.

**Madaxweynahu**

Markuu arkay: Dastuurka DGB ee Soomalia  
 Markuu garawsaday: Muhiimada ay leedahay kordhinta qaadida khidamaadka mamulka garoonada diyuuradaha ee DGB ee Soomaliya.  
 Markuu dhegaysgtey: Ray;iga Golaha Xukuumadda.  
 Markuu tixgeliyey: Ansixinta sharci Lr. 4 ee kordhinta khidmaadka garoonada diyuuradaha DGB Soomaliyeed sida ku ca warqada ansixinta Golaha Wakiilada ee summad GGW/DGBL/121/2003 ee 31/01/2003.

**Wuxuu soo saaray**

Sharcigan soo socda:

**Qodobka 1 aad**

Waxaa la ansixiyey shariciga kordhinta khidmaadka garoonadda diyaaradaha DGB ee Soomalia.

**Qodobka 2 aad**

Saddex nuqul oo sharcigan ka mid ah iyo lifaaqiisa Madaxweynuhu saxiixay waxaa loo Qaadanayaa asal (originale), waxaana lagu kala kaydinaayaa xafiiska Madaxweynaha hal Nuqul, xafiiska garyaqaanka guud hal nuqul iyo xafiiska xoghayaha Golaha Wakiilada hal nuqul.

**Qodobka 3 aad**

Sharcigan wuxuu dhaqan gelay 25 February 2003 asagoo ka mid noqonaya shuruucda dalka, qofkastana ay waajib ku tahay inuu dhowro kuna dhaqmo.

F.G

Khidmaadkan waxa loo ansixiyey hay'adda duulimaadka diyaaradaha ra'yadka ah.

Maxamed Cabdi Xaashi  
 Madaxweyna ku xigeenka  
 DGB Soomalia



**DAWLADDA PUNTLAND  
EE SOOMAALIYA**



**PUNTLAND STATE  
OF SOMALIA**

Xafiiska Madaxweynaha

Office of the President

**sharci Lr. 4.**

Garoowe, January, 29/,2003

**MADAXWEYNAHA DAWLADDA PUNTLAND**

<b>Markuu arkay</b>	Dastuurka Dawladda Puntland
<b>Markuu arkay,</b>	Qodobka 5-aad iyo 22-aad ee sharci Lr. 14, ee 13/06/1962
<b>Markuu Arkay</b>	Sharci Lr 01 ee 07/02/1965, isla sharcigii Lr. 08 ee 21, 11, 1965 Oo dhammaantoodba la xiriira Maamulka Garoonada diyaaradaha & khidmahada Garoonada ee kala duwan ee Dawlad Goboleedka Puntland.
<b>Markuu Arkay</b>	Sharci Lam. 8 ee 14/04/1999,.
<b>Markii</b>	Golaha xukuumaddu arkeen,

Waxaa la go'aamiyey in khidmadaha jiray ee ku qoran sharci Lr. 8 lagu kordhiyo khidmadaha hoos ku qoran laga bilaabo 1,jan, 2003,.

Qodobka d) khidmadaha diiwaan gelinta ( Registration fee ) waa sanad walba hal mar in la qaado USA \$ 300.

G- Khidmada xamuulka iyo tigidyada ( Cargo & Pax Royalist ).

- 1) Khidmada Xamuulka waa \$ 40 halkii tan ( 1000kgs)
- 2) Khidmada tigidyada 5% ( Pax Royalties )

*[Signature]*  
C/raxmaan Maxamed Maxamuud

Kusimaha Madaxweynaha  
Ahna wasiirka Maaliyadda

